

DULMARKA SANDUUQA FURSADAHA

- Waxay bixisaa taageero shaqo iyo adeegyo loogu talagalay inay daboolaan baahiyaha ka qaybgalayaasha. Adeegyada waxaa laga bixiyaa Bartamaha Alberta (Central Alberta) oo dhan.
- Dadkoo dhan waa inay **is aqoonsadaan (self-identify)** inay leeyihiin itaal darri jireed ama maskaxeed oo joogto ah ayna ka weyn yihiin da'da 15 sano.
- Dadka waa inay shaqo la'aan ahaayeen shantii sano ee la soo dhaafay.
- Dadka waa inay ahaadaan kuwo xasilloon oo u heellan helitaanka shaqada. Codsii kasta waxaa loo eegayaa iyadoo lagu saleynayo mudnaantiisa.
- **Ma awoodno** inaan la shaqeyno dad horay u ahaan/qaadan jiray;
 - ceymiska Shaqada (Employment Insurance, EI) shantii sano ee la soo dhaafay,
 - aad leeyahay argiga/codsiga Guddiga Magdhawga Shaqaalaha (Workers Compensation Board, WCB) oo **socda**,
 - aad ka qaadaneysa caymis bixiyaha waxtarrada naafada,
 - ama u qalanto barnaamijyada ama adeegyada gobolka maalgeliyo.
- **WAA INAAD ahaato midka maalgaliyaha ugu dambeeya.** Dhamaan maalgalinta kale waa in marka hore waa iney dhamaataa; waxaan awoodnaa inaan la shaqeyno maalgeliyeyaasha kale iyo bixiyeyaasha adeegga iskaashi. Ka caawin kara kaqeybgalayaasha;
 - kor u qaadista xirfadaha ama tababbarka si loo helo shaqo,
 - bixinta kharashyada dheeriga ah ee tababarka. loolana jeedo: buugaagta, gaadiidka, daryeelka maalinlaha, iwm.
 - kharashyada halka mar ah ee sida tooska ah ula xiriira shaqada sida baahiyaha gaarka ah ee dharka gaarka ah, kharashka gaadiidka ee ugu horeeya ama kharashka ugu horeeya ee daryeelka caruurta, iwm.
 - qalab lagu habeeyo ka qaybgalaha oo looga baahan yahay shaqo ama tababar,
 - iyo/ama kabida mushaharka loo shaqeyyeyaasha si ay ufududeeyaan qaar kamid ah kharashaadka tababarka kaqeybgalayaasha shaqada.

Wixii xog dheeri ah, fadlan la xiriir:

Barnaamijka Sanduuqa Fursadaha ee 403-343-6249 ama 1-877-643-6249

Waxaa maalgeliyey Sanduuqa Fursadaha Dowladda **Kanada (Canada)**